**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** | **REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 05/11/2022* |


# XEERKA ILAALINTA XUQUUQDA CARUURTA
# XEER LR.102/2022


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Sannadka 2022*


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-947/102022** **Taar: 29/10/2022**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta,**
**Xeer Lr: 102/2022**

**Markaan Arkay:** Qodobka $90^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobbada $38^{aad}$, $76^{aad}$ iyo $77^{aad}$, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-04/941/2022, ee ku taariikhaysan 09/10/2022, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta, Xeer Lr: 102/2022.

**Waxaan soo-saaray;**

**Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta, Xeer Lr: 102/2022.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Illaalinta Xuquuqda Caruurta Xeer Lr. 102/2022**

**GOLAHA WAKIILLADU**

**Markuu Arkay: -** Qodobka 5aad (2), Qodobka 10aad (2) Qodobka 21aad, (2) iyo Qodobka 128aad (2) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay: -** In ay muhiim tahay in la helo xeer lagu illaaliyo xaquuqda carruurta, isla markaana caddaynaya masuuliyadda guud iyo gaar ahaaneed ee lagu ilaalinayo xuquuqda iyo daryeelka carruurta.

**Markuu Aqoonsaday: -** Baahida loo qabo xeer damaanad qaada isla markaana lagu illaaliyo baahiyaha sharci, daryeel iyo xuquuq ee carruurta Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Yaqiinsaday: -** In tallaabooyinka wax lagaga qabanayo xuquuqda iyo daryeelka carruurta loo raaco si waafaqsan shareecada Islaamka, Dastuurka JSL, xeerarka kale ee dhaqan-galka ah, mucaahadada Qaramada Midoobay iyo heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda carruurta ee aan ka hor imanayn shareecada Islaamka iyo Dastuurka Qaranka.

**Markuu Arkay**: Go'aanka Ansixinta Illaalinta Xuquuqda Caruurta, **Xeer Lr. 102/2022** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **06/02/2022** kalfadhigii **2aad** fadhigiisi **22aad.**

**Markuu Arkay**: In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen afartan **(40)** Cod Xeerka Illaalinta Xuquuqda Caruurta, **Xeer Lr. 102/2022**, kuna taariikhaysnaa **16/07/2022**

**WUXUU**

Cod aqlabiyad ah **52 cod oo** gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Illaalinta Xuquuqda Caruurta (Xeer Lr. 102/2022)**.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Cabdirisaaq Khaliif Axmed** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** | **Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda** |

GOLAHA WAKIILADA * JAMHUURIYADA SOMALILAND *

# Tusmada Xeerka


CUTUBKA KOOWAAD .......... 9

QODOBBADA GUUD .......... 9

Qodobka 1aad .......... 9

Magaca Xeerka .......... 9

Qodobka 2aad .......... 9

Earay-bixinno .......... 9

Qodobka 3aad .......... 10

Ujeeddooyinka Xeerka .......... 10

Qodobka 4aad .......... 10

Mabaadii'da Guud iyo Fasiraadda Xeerka .......... 10

Qodobka 5aad .......... 10

Xadka Adeegsiga Xeerka .......... 10

Qodobka 6aad .......... 10

Waafaqsanaanta Dastuurka .......... 10

CUTUBKA LABAAD .......... 11

MASUULIYADAHA .......... 11

Qodobka 7aad .......... 11

Masuuliyadda Guud .......... 11

Qodobka 8aad .......... 11

Masuuliyadda Gaarka ah .......... 11

Qodobka 9aad .......... 11

Xaqa Caddaynta Waalidnimida iyo Walaaltinimada .......... 11

Qodobka 10aad .......... 12

Masuuliyadda Qoyska .......... 12

Qodobka 11aad .......... 12

Danta U Wanaagsan Ilmaha .......... 12

Qodobka 12aad .......... 12




XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Xaqa Ixtiraamka Aragtida iyo Rabitaanka Ilmaha ..... 12

CUTUBKA SADDEXAAD ..... 13

XUQUUQAHA GUUD ..... 13

Qodobka 13aad ..... 13

Xuquuqaha Aasaasiga Ah ..... 13

Qodobka 14aad ..... 13

Xaqa Nolosha, Badbaadada iyo Horumarka ..... 13

Qodobka 15aad ..... 13

Xaqa in Laga Ilaaliyo Dayacaadda ..... 13

Qodobka 16aad ..... 13

Xaqa Xorriyadda Iyo Amniga Ilmaha ..... 13

Qodobka 17aad ..... 14

Xaqa Diiwaangelinta Dhalashada ..... 14

Qodobka 18aad ..... 14

Xaqa Islaamnimada ..... 14

QAYBTA LABAAD ..... 14

XUQUUQAHA BARBAARINTA ..... 14

Qodobka 19aad ..... 14

Xaqa Barbaarinta ..... 14

Qodobka 20aad ..... 14

Xaqa Magaca, Dhalashada iyo Aqoonsiga ..... 14

Qodobka 21aad ..... 15

Xaqa Waxbarashada ..... 15

Qodobka 22aad ..... 15

Xaqa Sinaanshaha ..... 15

CUTUBKA AFRAAD ..... 15

DARYEELKA GAARKA AH ..... 15

Qodobka 23aad ..... 15

Xaqa Daryeel Waalidnimo ..... 15



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qodobka 24aad ..... 16

Xaqa Ilaalinta Carruurta Baahiyaha Gaarka ah Qaba ..... 16

Qodobka 25aad ..... 16

Xaqa Nasashada Iyo Ciyaarta ..... 16

Qodobka 26aad ..... 16

Xaqa Noolosha Gaarka ah ..... 16

Qodobka 27aad ..... 16

Xaqa Kafaalo-qaadashada Ilmaha ..... 16

Qodobka 28aad ..... 17

Xaqa Adeegyada Caafimaad ..... 17

Qodobka 29aad ..... 17

Xaqa in laga Illaaliyo Jidh Dilka, Hab-dhaqanka Bani-Aadannimada ku Xun ama Sharaf Dilka ah ..... 17

Qodobka 30aad ..... 17

Xaqa in Laga Illaaliyo Xadgudubka ..... 17

Qodobka 31aad ..... 17

Xaqa Keydinta Xogaha iyo Warbixinta Tacadiyadda ..... 17

CUTUBKA SHANAAD ..... **18**

XAQA ADEEGGA KAALMO SHARCI ..... **18**

Qodobka 32aad ..... 18

Xaqa Ilmuhu u Leeyahay Kaalmo Sharci oo Bilaash ah ..... 18

Qodobka 33aad ..... 18

Guddida Illaalinta iyo Daryeelka Xuquuqda Caruurta ..... 18

Qodobka 34aad ..... 18

Waajibaadka Guddida ..... 18

CUTUBKA LIXAAD ..... **19**

DANBIYADA IYO CIQAABAHA ..... **19**

Qodobka 35aad ..... 19

Danbiyada lagu soo oogo Carruurta iyo Ciqaabaha ..... 19


XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qodobka 36aad ..... 19

Danbiyada laga Galo Carruurta iyo Ciqaabaha Ka Dhalanaya ..... 19

Qodobka 37aad ..... 19

Laalis Iyo Tirtirid ..... 19

Qodobka 38aad ..... 19

Awoodda Soo Saarista Xeer-Nidaamiyeyaal ..... 19

Qodobka 39aad ..... 20

Dhaqan-galka ..... 20

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## GOLAHA WAKIILADU

Markuu Arkay: - Qodobka 5aad (2), Qodobka 10aad (2) Qodobka 21aad, (2) iyo Qodobka 128aad (2) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Arkay: - In ay muhiim tahay in la helo xeer lagu illaaliyo xaquuqda carruurta, isla markaana caddaynaya masuuliyadda guud iyo gaar ahaaneed ee lagu ilaalinayo xuquuqda iyo daryeelka carruurta.

Markuu Aqoonsaday: - Baahida loo qabo xeer damaanad qaada isla markaana lagu ilaaliyo baahiyaha sharci, daryeel iyo xuquuq ee carruurta Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Yaqiinsaday: - In tallaabooyinka wax lagaga qabanayo xuquuqda iyo daryeelka carruurta loo raaco si waafaqsan shareecada Islaamka, Dastuurka JSL, xeerarka kale ee dhaqan-galka ah, mucaahadada Qaramada Midoobay iyo heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda carruurta ee aan hor imanayn shareecada Islaamka iyo Dastuurka Qaranka.

## WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN

Xeerka Illaalinta Xuquuqda Carruurta.
Xeer Lr. 102/2022.

## CUTUBKA KOOWAAD
## QODOBBADA GUUD

### Qodobka 1aad

### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Illaalinta Xuquuqda Carruurta Xeer Lr. 102/2022.

### Qodobka 2aad

### Earay-bixinno

Haddii aanu xeerku si kale u fasirin ereyadan waxa loola jeeda sidan:

**Carruur:** Waxaa loola jeedaa ilmaha da'diisu ka yar tahay 15 sanno.

**Qaangaadh:** Waxaa loola jeedaa ilmaha da'diisu ka weyn tahay 15 sanno ama lagu arko astaamaha caddaynaya qaangaadhka.

**Dastuur:** Waxaa loola jeeda Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Dawladda:** Waxaa loola jeedaa dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wasiir:** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha bulshada iyo Qoyska.

**Wasaarad: -** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha bulshada iyo Qoyska.

**Waalid:** Waxaa loola jeedaa cidda dhashay ilmaha ama daryeelaha gacanta ku haya.

**Qoys:** Waxaa loola jeedaa Waalidiinta iyo Carruurtoodda.

**Danta u wanaagsan ilmaha:** Waxaa loola jeedaa Ilaalinta xaqa ilmuhu u leeyahay nolol, horumar, caafimaad iyo bad-qab, islamarkaana damaanad qaadka sharafta, magac-samida, aqoonsiga, diinta iyo shaqsiyadda ilmuhu waa ujeeddada aasaasiga ah ee fal kasta.

**Dayacaadda:** Waxaa loola jeedaa ilme kasta oo aan helin dhammaan qaybaha kala duwan ee noloshiisa sida: daryeel waalidnimo, koriinka jidh ahaaneed, maskax ahaaneed, daryeelka caafimaadkiisa, waxbarashadiisa iyo xuquuqaha kale ee xeerku jideeyay iyo sifo kasta oo u muuqda in ay dan u tahay ilmaha oo aan ka hor imanayn Shareecada Islaamka, Dasuurka iyo xeerarka dalka.

**Kafaalo-qaadasho:** Waxaa loola jeedaa cidkasta oo lagu aamino masuuliyadda iyo barbaarinta ilmaha una haysa awood dhaqaale oo ay ku daryeesho.

**Xadgudub:** Waxaa loola jeedaa wax kasta oo ilmaha wax u dhimi kara jidh-ahaan iyo maskax ahaanba.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

**Guddi: -** Waxaa loola jeedaa Guddida Illaalinta Xuquuqda Carruurta ee lagu tilmaamay Qodobka 33aad ee Xeerkan.

**Kaalmo sharci:** Waxaa loola jeedaa adeeg Sharci oo billaash ah oo ay bixiso Wasaaradda Cadaaladdu waxna loogu qabanaayo ilmaha.

**Carruurta Baahiyaha-gaarka ah leh: -** Waxaa loola jeedaa Caruurta Indhaha-la, Dhagaha la' Maskax ahaan ama jidh ahaan waxyeelo qaba.

**Darbi-jiif: -** Waxaa loola jeedaa Carruurta baylahsan ee aan lahayn waalid daryeela iyo ehel toona

**Faquuq: -** Waxaa loola jeedaa takoorid

**Ehel: -** Waxaa loola jeedaa xigtada Carruurta

## Qodobka 3aad

## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka xeerkani waa:

1. In la helo xeer loo raaco ilaalinta xuquuqda carruurta si waafaqsan shareecada Islaamka, Dastuurka JSL, xeerarka kale ee dhaqan-galka ah iyo mucaahadada Qarammada Midoobay iyo heshiisyada caalamiga ah xuquuqda carruurta ee aan ka horimanayn Shareecada Islaamka iyo Dastuurka qaranka.
2. In la helo xeer cadaynaaya masuuliyadda guud iyo gaar ahaaneed ee lagu ilaalinayo xuquuqda iyo daryeelka carruurta.
3. In la helo Xeer jidaynaya waajibaadka gaarka ah ee dawladda ka saaran illaalinta, fulinta, sare u qaadidda iyo daryeelka Xuquuqda Carruurta.

## Qodobka 4aad

## Mabaadii'da Guud iyo Fasiraadda Xeerka

1. Xeerkan waxa saldhig u ah shareecadda Islaamka si waafaqsan qodobka 5aad, faqraddiisa 2aad iyo 128aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka JSL.
2. Xeerkan waxa loo fasirayaa si waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee Qaramadda Midoobey inta aan ka hor imanayn Shareecadda Islaamka si waafaqsan qodobka 21aad, faqraddiisa 2aad iyo qodobka 10aad faqraddiisa 2aad ee Dastuurka JSL. Waxa sidoo kale waajib ah in markasta xeerkan loo fasiro si dani ugu jirto ilamaha xuquuqihiisa ee aan ka hor imanayn shareecadda Islaamka.

## Qodobka 5aad

## Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxa lagu dhaqayaa dhammaan carruurta ku nool Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 6aad

## Waafaqsanaanta Dastuurka

1. Xeerakni waxa uu waafaqsanyahay shareecada Islaamka, mabaadii'da guud ee la'xidhiidha daryeelka iyo ilaalinta xuquuqda carruurta iyo Dastuurka, gaar ahaan qodobka 10aad (2) iyo qodobka 19aad ee Dastuurka JSL.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Da'da qaangaadhka ilmaha waxa loo raacayaa si waafaqsan shareecada Islaamka oo tilmaamaysa in ilmuhu ku qaangaadhayo 15 sanno iyo haddii lagu arko astaamaha caddaynaya qaangaadhka.

## CUTUBKA LABAAD
## MASUULIYADAHA

### Qodobka 7[aad]

### Masuuliyadda Guud

1. Masuuliyadda guud ee ilaalinta xuquuqda carruurta waxa u xil saaran dawladda JSL.
2. Dawladdu waxa ay xilkeeda u gudanaysaa si waafaqsan oo aan ka hor imanayn shareecada Islaamka, Dastuurka, xeerarka dhaqan-galka ah iyo mabaadii'da guud ee la'xidhiidha ilaalinta xuquuqda carruurta.
3. Wasaaradda Shaqo-gelinta Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ayaa leh masuulliyadda guud ee ilaalinta iyo daryeelka xuquuqda carruurta iyo dhaqan-galinta xeerkan iyada oo kaashanaysa hay'adaha kale ee ay khusayso.
4. Wasaaraddu xilkeeda waxa ay u gudanaysaa si waafaqsan waajibaakeeda ku tilmaaman xeerkan iyo xeerarka kale
5. Wasaaraddu waxa ay abuuraysaa hannaan kasta, qaab dhismeed kasta iyo hal-beeg kasta oo lagu ilaalinayo xuquuqda carruurta oo aan ka hor imanayn shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.

### Qodobka 8[aad]

### Masuuliyadda Gaarka ah

1. Masuuliyadda gaarka ah ee ilaalinta xuquuqda carruurta waxa xil ka saaran yahay waalidka ilmaha ama daryeelaha ilmaha gacanta ku haya.
2. Waalidka ama daryeelaha gacanta ku haya ilmuhu waxa uu masuuliyaddiisa u gudanayaa si waafaqsan shareecada Islaamka, Dastuurka iyo heshiisyada caalamiga ah ee aan ka hor imanayn shareecada Islaamka iyo Dastuurku dalka.
3. Waalidka ama daryeelaha gacanta ku haya waxa uu masuuliyaddiisa u kala gudanayaan sida ay shareecadu ugu xadaysay.

### Qodobka 9[aad]

### Xaqa Caddaynta Waalidnimida iyo Walaaltinimada

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in loo caddeeyo waalidka dhalay haddii ay dhacdo xaaladahan soo socdaa: -
   b. Haddii laba qoys ama laba qof isku qabsadaan ilmaha, iyada oo loo raacayo xaaladaha shareecadu jidaysay
   t. Caddaynta waalidnimo waxa ay saarantahay qofka ama qoyska sheeganaya iyada oo lagu xaqiijinayo caddaymaha hidde-sidaha (DNA) si waafaqsan shareecada Islaamka.
2. haddii laba ilme oo walaalo ahi ay ku murmaan walaaltinimada waa in loo raacaa xaqiijintooda lagu kala saarayo hidde-sidaha (DNA) si waafaqsan shareecada Islaamka.
3. Ugu danbayna Maxkamadda Awooda u leh ayaa go'aan ka gaadhaysa xaaladaha caddaynta nasabka ilmaha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 10^aad^

### Masuuliyadda Qoyska

1. Marka ay ilmaha waalidkiisu dhintaan, dayacaan ama aanay awood u lahayn in ay daryeelaan, masuuliyadda waalidnimo waxay u wareegaysa ehelka ilmaha iyada oo loo kala horraysiinayo sida ay shareecadu u jidaysay.
2. Masuuliyadda ehelku sida ay u kala horraynayso waxaa xaqiijinaya maxkamadda, iyada oo la kaashanaya Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.
3. Haddii aanu Ilmuhu lahayn waalid iyo ehel daryeela, waajibka masuuliyadda gaar ka ah ee ilaalinta xuquuqda iyo daryeelka ilmuhu waxa ay saaran tahay dawladda.
4. Haddii labada waalid isku khilaafaan ilme ama Carruur wadanka Somaliland joogta in loo dhoofiyo ama lagu celiyo wadan kale oo ay hore u joogeen waxaa loo raacidoonaa waalidka raba in Caruurtaas lagu koriyo wadankooda, iyadoo loo danaynaayo ilmaha, si waafaqsan Dhaqanka suuban iyo Diinta Islaamka.

## Qodobka 11^aad^

### Danta U Wanaagsan Ilmaha

1. Danta u wanaagsan ee ilmaha waa in mar walba la siiyaa tixgelinta koowaad marka ay qaadanayaan tallaabo la'xidhiidha caruuurta Maxkamad ama hay'ad dawladeed (heer qaran, heer gobol iyo heer degmaba) ama qof kasta oo kale oo go'aan ka gaadhaya arrin la'xidhiidha korriinka ama daryeelka ilme ama maamulidda hantida ilmaha ama dakhli kasta oo ay dhasho iyada oo loo raacayo sida ay jidaynayso shareecada Islaamku.
2. Marka ay go'aan ka gaadhayso maxkamad ama hay'ad kale oo awood u lihi danta u wanaagsan ee ilmaha waa in tixgelinta la siiyaa daryeelka ilmaha gaar ahaan: -
   b) Xuquuqda shareecada Islaamku siisay ilmaha iyada oo la eegayo da'da qaangaadhka iyo fahamka ilmaha.
   t) Saamaynta ay ku yeelan karto isbeddelka lagu sameeyo duruuftiisa.
   j) Da'diisa, rag iyo dumar midka uu yahay, aqoonsiga dhalashadiisa, ku dhaqankiisa diinta Islaamka, dhaqankiisa, taariikhdiisa hore iyo astaamaha kale ee u muuqda in ay ku habboon yihiin.
   x) Ilaalinta xaqa ilmuhu u leeyahay nolol, horumar, caafimaad iyo bad-qab, islamarkaana damaanad qaadka sharafta, magac-samida, aqoonsiga, diinta iyo shaqsiyadda ilmuhu waa ujeeddada aasaasiga ah ee fal kasta.

## Qodobka 12^aad^

### Xaqa Ixtiraamka Aragtida iyo Rabitaanka Ilmaha

1. Dhammaan ficillada iyo hab-raaca go'aan gaadhista ee la qaato iyada oo la dabbaqayo xeerkan, gaar ahaan dacwadaha idaariga ah iyo kuwa garsoor, aragtiyaha iyo rabitaanka ilmaha waa in la'tixgeliyaa iyada oo la eegayo da'diisa iyo qaangaadhnimadiisa.
2. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu raadsado, helo, gudibiyo xog iyo aragti ka turjumaysa xadka shareecada iyo dhaqanka wanaagsan.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## XUQUUQAHA GUUD

### Qodobka 13$^{aad}$

### Xuquuqaha Aasaasiga Ah

1. Carruurtu waxa ay leeyihiin xuquuqaha aasaasiga ah ee ku tilmaaman shareecada islaamka.
2. Carruurtu si la siman bulshada inteeda kale waxa ay xaq u leeyihiin xuquuqaha aasaasiga ah ee kala duwan ee Dastuurka jideeyay.

### Qodobka 14$^{aad}$

### Xaqa Nolosha, Badbaadada iyo Horumarka

1. Ilme kasta oo u dhashay Somaliland waxa uu xaq u leeyahay in loo ilaaliyo caqiidadiisa diinta Islaamka, noloshiisa iyo horumarkiisa.
2. Ilaalinta nolosha ilmuhu waa in ay noqotaa waajibka koowaad ee saaran qof kasta oo ay ku waajibtay masuuliyadda gaarka ah, hay'ad kasta oo leh masuuliyadda guud ee la'xidhiidha ilaalinta xuquuqda carruurta.
3. Xaqa ilmaha ee badbaadada iyo horumarka oo ah fayo-qabka (well-being) iyo horumarka jidheed, maskaxeed iyo nafsi, dareen, iyo bulsho ee ilmaha, waa in loo ilaaliyaa xadka ugu badan ee suurtagalka ah.
4. Waa masuuliyad saaran waalidka caruurta, qoyska, dadka waa weyn iyo dawladda in ay kobciyaan oo daryeelaan si uu ilmuhu u badbaado una horumaro.

### Qodobka 15$^{aad}$

### Xaqa in Laga Ilaaliyo Dayacaadda

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in aan la dayicin dhammaan qaybaha kala duwan ee noloshiisa sida: daryeel waalidnimo, koriinka jidh ahaaneed, maskax ahaaneed, daryeelka caafimaadkiisa, waxbarashadiisa iyo xuquuqaha kale ee xeerku jideeyay iyo sifo kasta oo u muuqda in ay dan u tahay ilmaha oo aan ka hor imanayn Shareecada Islaamka, Dasuurka iyo xeerarka dalka.
2. Sababaha iyo saamaynta dayacaadda waa in ay qiimeeyaan hawl-wadeennada u xil-saaran ilaalinta iyo daryeelka carruurta ee Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska iyada oo kaashanaysa Guddida Ilaalinta Xuquuqda Carruurta ee heer qaran iyo maxkamadda.
3. Guddiyada Xuquuqda Carruurta ee heer qaran iyo heer gobol waa in ay qorsheeyaan oo ay kobciyaan ololayaal wacyigelineed oo ku aadan dayacaadda.
4. Haddii masuulka Ilmahu (Waalidka, Ehelka ama dawladda) uu muddo bil ah bixin wayo nafaqada ilmaha ama siin waayo daryeelka iyo xuquuqda xeerku jideeyay waxa loo aqoon sanayaa dayacaad ilme.

### Qodobka 16$^{aad}$

### Xaqa Xorriyadda Iyo Amniga Ilmaha

1. Ilme kastaa waxa uu leeyahay xaqa xorriyadda iyo amniga qof ahaaneed iyada oo loo raacayo qodobka 24aad faqradiisa 2aad ee dastuurka iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta Xeer Lr. 36/2007 qodobkiisa 8$^{aad}$, 47$^{aad}$ iyo 55$^{aad}$.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Ilme lama xidhi karo/qaban karo, lagamana qaadi karo xorriyaddiisa haddii aanay dantiisu ku jirin oo ah tallaabadii ugu danbaysay iyada oo la haynayo muddada ugu yar ee suurtogalka ah loona raacayo hab-raacyda ku tilmaaman Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta.

### Qodobka 17aad

### Xaqa Diiwaangelinta Dhalashada

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in ay dawladda ama cidda ay u wakiilatay diiwaangaliso dhalashadiisa.
2. Diiwaangalinta dhalashada ilmaha waxa loo raacayaa si waafaqsan xeerka.
3. Xaaladaha xaqiijinta da'ada ilmaha waxa loo raacayaa xogta diwaanka ilmaha. Haddiise aanay jirin waxa loo raacaya hadba sida suurtogalka ah ee lagu xaqiijin karo.

### Qodobka 18aad

### Xaqa Islaamnimada

Carruurtu waxa ay xaq u leeyihiin in loo ilaaliyo shacaa'irta islaamiga ah iyo ku toosnaanta diinta suubban xilliga korinta iyo ka hor inta aanay qaangaadhin ee masuuliyaddooda gaarka ah waalidku gacanta ku hayo.

## QAYBTA LABAAD
## XUQUUQAHA BARBAARINTA

### Qodobka 19aad

### Xaqa Barbaarinta

Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay:

1. In lagu barbaariyo dhaqanka wanaagsan iyo ku toosnaanta diinta Islaamka.
2. In lagu barbaariyo addeecidda Eebbe (SWT) iyo Rasuulkeena (SCW) waalidka, dadka wanaagsan iyo cidkasta oo ixtiraam ka mudan.
3. In lagu barbaariyo baarrinimada waalidka, masuuliyadda si marka uu weynaado u guto masuuliyadaha ka saran shareecada Islaamka, dalkiisa, dadkiisa iyo diintiisaba.

### Qodobka 20aad

### Xaqa Magaca, Dhalashada iyo Aqoonsiga

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac aan ka hor imanayn sifooyinka shareecadu inoo jidaysay si uu bulshada astaamo wanaagsan ugu dhex lahaado.
2. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo dhalasho si waafaqsan xeerka Jinsiyadda iyo Dastuurka.
3. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu haysto aqoonsigiisa oo ay ka mid tahay haysashada magaciisa, dhalashadiisa iyo xidiidhkiisa qoys iyada oo wax farogelin ah aanay kaga imanayn cid kasta.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

### Qodobka 21^aad

### Xaqa Waxbarashada

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho diimeed iyo mid maaddi ah illaa heer Jaamacadeed.
2. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo fursado waxbarasho si uu u anfaco noloshiisa danbe.
3. Dawladda ayaa xil ka saaran yahay iyada oo ay masuul uga sii tahay Wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Qoyska sidii carruurta aan ka korin da'da waxbarashada ay u heli lahaayeen waxbarasho dhammaystiran sida Dastuurku u waajibiyay.

### Qodobka 22^aad

### Xaqa Sinaanshaha

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in si la siman ubadka kale ee jidh ahaan iyo maskax ahaan fayow loo daryeelo.
2. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in aan lagu faquuqin abuurka u gaarka ah, dabeecaddiisa, lab, dheddig, qabiilkiisa iyo xaaladdiisa nololeed.

## CUTUBKA AFRAAD
## DARYEELKA GAARKA AH

### Qodobka 23^aad

### Xaqa Daryeel Waalidnimo

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo daryeel waalidnimo oo dhammaystiran sida: daryeel waxbarasho, daryeel caafimaad iyo daryeel nololeed.
2. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu la noolaado oo ay daryeelaan waalidkiisu, haddii ay gudan kariwaayaan masuuliyaddii waalidnimo ee shareecadu u jidaysay mooyaane.
3. Ilmaha aan lahayn labadiisa waalid waxa uu xaq u leeyahay in uu helo daryeel waalidnimo oo dhammaystiran iyada oo mudnaanta la siinayo eheladiisa si waafaqsan qodobka 10(3^aad) ee xeerkan.
4. Dawlada waxaa waajib ku ah inay samayso xarumo lagu daryeelo Carruurta aan lahayn waalid iyo ehel daryeela, cidina aanay kafaalo qaadan, lana socoto xaaladaha ay ku sugan yihiin Carruurta ku jira xarumaha dawaladu gacanta ku hayso, iyadoo lagu barbaarinaayo Diintooda, Dhaqankooda iyo Taariikhda Dalkooda.
5. Wasaaraddu waa in ay dejisaa halbeegyo iyo hagayaal ay ku korjoogtaynayso daryeelayaasha carruurta gacanta ku haya.
6. Ilmaha ku jira xaaladda daryeelka waxa uu xaq u leeyahay in aan dalka dibaddiisa loo dhoofin karin, deegaan kale la gayn karin iyada oo aan ogolaansho maxkamadeed loo haysan.
7. Hadii ilme ku jira xaalad daryeel uu soo gaadho dhaawac culus ama xadgudub, daryeelaha waxa waajib ku ah ka warbixinta xaaladda ilmaha sidoo kale waa in uu islamarkaaba warbixinta gaadhsiiyaa hawl-wadeennada wasaaradda u xil saaran ilaalinta xuquuqda carruurta iyo hay'daha sharci fulineed ee ay waajib ku tahay in ay sameeyaan baadhitaan la'xidhiidha dhaawaca iyo xadgudubka Ilmaha.
8. Hadii ilme kamid ah Caruunta ku jirta xarumaha daryeelka Caruurta ee Dawlada ee aan lahayn ehel iyo waalid uu ku abtirsado xaga aabaha iyo hooyada toona wixii dhib ah ee uu gaysto dhaawac iyo dhimashaba waxaa loo raacayaa dowladda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

9. Hadii ilme kamid ah Carruunta ku jirta xarumaha daryeelka caruurta ee Dawladda ee aan lahayn waalid iyo ehel uu ku abtirsado xaga aabaha iyo hooyada toona wixii dhib ah ee loo gaysto ee dhimasho ah waxaa magtiisa leh dowlada.

## Qodobka 24^aad

## Xaqa Ilaalinta Carruurta Baahiyaha Gaarka ah Qaba

1. Ilme kasta oo leh baahi gaar ah sida: ilmaha aan daryeel waalidnimo haysan, suuqa ku nool, xannuunada la nool, naafa ah, barakacayaasha ah, qaxoontiga ah, socotada ah, iyo xaalad kasta oo loo arki karo in uu ilmuhu u nugul yahay, una muuqata baahi gaar ah waxa uu xaq u leeyayahay:
   b. In uu helo daryeel gaar ahaaneed.
   t. In aan lagu faquuqin baahidiisa gaarka ah.
   j. In si dhammaystiran uu u helo adeegyada nololeed sida: waxbarashada, caafimaadka, goobaha ciyaaraha/nasashada iyo daryeelka guud.
   x. In aan looga faa'iidaysan baahidooda gaarka ah.
2. Ilme kasta oo ku sugan xaaladaha ilmaha dayacan (darbi-jiifka), xannuunada la nool, barakacayaasha ah, qaxoontiga ah, socotada ah iyo xaalad kasta oo loo arki karo in ilmuhu u nugul yahay waxa uu xaq u leeyayahay xuquuqda ku tilmaaman faqradda 1aad ee qodobkan.

## Qodobka 25^aad

## Xaqa Nasashada Iyo Ciyaarta

Dawladdu iyada oo gudanaysa masuuliyadda guud ee ka saaran ilaalinta xuquuqda carruurta waa inay:
-
   b. Abuurtaa goobaha ciyaaraha iyo nasashada ee carruurta ku habboon horumarka jidh ahaaneed iyo maskax ahaaneed.
   t. Dhiirigalinta goobaha ciyaaraha carruurta baahiyaha gaarka ah la nool.
   j. Kobcisaa ka qaybgalka carruurta ee ciyaaraha, dhacdooyinka dhaqan, fanka iyo hawlaha kale ee barbaarinta habboon.

## Qodobka 26^aad

## Xaqa Noolosha Gaarka ah

Xogaha ilmaha ee noloshiisa gaarka ah waa in laga ilaaliyaa farogelinta xun ama sharci darrada ah ee ku keeni karta waxyeello sharafeed, magac-samidiisa iyo Sumcad xumaynta ilmaha.

## Qodobka 27^aad

## Xaqa Kafaalo-qaadashada Ilmaha

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo cid kafaalo qaadata haddii ay jirto cid si gaar ah u doonaysa in ay qaaddo masuuliyadda daryeelka iyo barbaarinta ilmaha.
2. Cid kasta oo doonaysa in ay ka faalo-qaadato ilme ama carruur waxa looga baahan yahay in ay/uu ku sifoobo:

   B. Islaamnimo
   T. Muwaadinnimo (Waddani)
   J. Dhaqan wanaagsan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

X. Iyo in uu leeyahay awood masuuliyadeed oo uu ilmaha ama carruurta ku kaafalo-qaato

3. Faahfaahinta habka kafaala-qaadashada iyo hannaanka lagu xaqiijinkaro kafaalo-qaadashada Maxkamadda Degmadu waxa ay u raacaysaa habka kafaalo-qaadashada ee shareecadu u jidaysay, mucaahadada caalamiga ah ee xuquuqda carruurta iyo hagaha daryeelka carruurta aan daryeel waalidnimo haysan.

### Qodobka 28aad

### Xaqa Adeegyada Caafimaad

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo adeeg caafimaad oo dhammaystiran marka ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad oo u muuqan karta mid aan daawo lahayn ama dhaqaale ahaan daawadooda aanay awoodin waalidka iyo ehelka Ilmuhu.
2. Dawladdu waa in ay damaanad qaaddaa adeegyada caafimaad ee ilmuhu u baahan yahay xilliga ay ilamaha la soo darsaan xaaladaha caafimaad ee faqradda hore ku tilaaman sida xanuunada aanay dhaqaale ahaan awoodin waalidka ama ehelka ilmuhu.
3. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo talaallada lagaga hortago xanuunnada faafa.

### Qodobka 29aad

### Xaqa in laga Illaaliyo Jidh Dilka, Hab-dhaqanka Bani-Aadannimada ku Xun ama Sharaf Dilka ah

Ilme kastaa waxa uu xaq ugu leeyahay dawladda, waalidkii, illaaliyaha, daryeel bixiyaha, macalimiinta, booliska ama cid kasta oo kale oo masuul ka ah ilaalinta ilmaha in ay ka ilaaliyaan dhammaan falalka xadgudubka ah, isticmaalka maandooriyaha iyo waxyeello dareen, dayacaad ama dhiig-miirasho.

### Qodobka 30aad

### Xaqa in Laga Illaaliyo Xadgudubka

1. Ilma kastaa waxa uu xaq ugu leeyahay waalidkii, dawladda, illaaliyaha, daryeel bixiyaha, macallimiinta, booliiska ama cid kasta oo kale oo masuul ka ah illaalinta ilmaha in ay ka ilaaliyaan dhammaan falalka u dhigma xadgudub jidheed iyo waxyeello dareen.

2. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in laga fogeeyo qafaalashada ama dhoofinta (trafficking) sharci darada ah.

### Qodobka 31aad

### Xaqa Keydinta Xogaha iyo Warbixinta Tacadiyadda

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in laga warbixiyo fal kasta oo u muuqda xadgudub lagula kacay iyada oo loo gudbinayo hay'addii ay khusaysay.
2. Hay'ad kasta oo loo gudbiyay warbixinta xadgudubka ilmaha waxa waajib ku ah in ay xil iska saarto iyada oo kaashanaysa hay'adaha kale ee ay khusayso.
3. Xogaha la'xidhiidha ilmaha waxa loo keydinayaa ama loo gudbinayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dasuurka iyo xeerkan,



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# CUTUBKA SHANAAD
# XAQA ADEEGGA KAALMO SHARCI

## Qodobka 32aad

### Xaqa Ilmuhu u Leeyahay Kaalmo Sharci oo Bilaash ah

1. Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo adeeg kaalmo sharci oo bilaasha ah dhammaan dacwadaha.
2. Wasaaradda Cadaaladda ayaa waajib ka saaran yahay in ay siiso kaalmo sharci ilme kasta oo la jebiyay xuquuqdiisa ku suntan xeerkan ama xeerarka kale.
3. Kaalmo sharci waxa ka mid ah metelaad iyo talo sharci oo ku aadan xuquuqda carruurta iyo hababka sharci ee dacwadaha ciqaabta iyo kuwa madaniga ah loo maro.

## Qodobka 33aad

### Guddida Illaalinta iyo Daryeelka Xuquuqda Caruurta

1. Xeerkan waxa lagu aasaasay Illaalinta iyo Daryeelka Xuquuqda Caruurta kuwaas oo ka kooban 7 Xubnood kana kala socda: -
   b. Xubin daryeele bulsho ah oo ka socota Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska
   t. Xubin ka socota Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska
   j. Xubin dhakhtar ah oo ka socota Wasaaradd Horumarinta Caafimaadka
   x. Xubin sharci-yaqaan ah oo ka socota Wasaaradda Cadaaladda
   Kh. Xubin culimo ah oo ka socota Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta
   d. Xubin ka socota Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi-gelinta
   r. Xubin ka socota Komishanka Xuquuqda Aadamaha, kana mid ah xubnaha komishanka
2. Dhammaan xubnaha waxaa soo xulaya madaxda hay'adahaas, waxaana marka ay soo dhammaystirmaan wareegto rasmi ah ku magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska
3. Xubnuhu waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiye, Guddoomye-ku-xigeen, muddo xileedkooduna waxa uu noqonayaa laba sanno iyada oo ay bannaan tahay in xubintii guddidan ka mid noqoto laba jeer oo kali ah.
4. Awoodaha iyo waajibaadka guddida waxaa lagu faahfaahinayaa xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska.

## Qodobka 34aad

### Waajibaadka Guddida

Guddida lagu aasaasay qodobka hore waxa ay yeelanaysaa waajibaadkan:

1. Ururinta iyo diyaarinta xogaha la'xidhiidha xadgudubka xuquuqda carruurta kala duwan ee xeerku tilmaamay.
2. In ay seddexdii biloodba hal mar qiimeeyaan isla markaana warbixin ka soo saaraan xaaladaha carruurta una gudbiyaan dhammaan hay'adaha ay khusayso.
3. In ay gacan ka siiyaan Komishanka Xuquuqda Aadamaha baadhista iyo dabagalka xadgudub kasta oo loo gestay ilme ama carruur
4. In ay la socdaan isla markaana xaqiijiyaan xogaha la'xidhiidha carruurta ee ay baahiyaan/bandhigaan ama daabacaan hay'adaha aan dawliga ahayn.
5. In ay kormeerto isla markaana xogo ka hesho goobaha lagu daryeelo carruurta.

6. Xidhiidhinta xogaha daryeelayaasha bulsho ee gobollada iyo degmooyinka.
7. Guddidu ma laha awood baadhiseed oo ay ku xaqiijiso in xadgudub loo gaystay ilme ama carruur, waxaana ka reebban in ay u gudubto waaajibaadka guddida Komishanka Xuquuda Aadamaha xeerku u jideeyay.

## CUTUBKA LIXAAD
## DANBIYADA IYO CIQAABAHA

### Qodobka 35aad

### Danbiyada lagu soo oogo Carruurta iyo Ciqaabaha

1. Danbiyadda ay galaan carruurtu waxa loo raacayaa Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Carruurta, Xeer Lr. 36/2007.
2. Inta ay leegtahay masuuliyadda danbi (criminal responsibility) ee ay carruurtu qaadi karaan waxa loo raacayaa Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Carruurta Xeer Lr. 36/2007.
3. Ilmaha khilaafa sharciga waxa loo samaynayaa xabsi ka leexin iyada oo ay isla markaasna waajib ku tahay xukuumaddu in ay hir galiso goobihii dhaqan celinta ee carruurta, goobahaasi oo ay caruurtu ka heli karaan dhammaan xuquuqahooda aasaasiga sida: waxbarasho, caafimaad iyo daryeelba.
4. Carruurta gaadhay da'da masuuliyadda danbiga ee lagu sheegay qodobka 10 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta (Xeer Lr.36/2007) waxa lagu haynayaa muddada baadhista faldambiyeedka lagu soo eedeeyey goob ku habboon xaaladdooda carruureed. Waxaana reebban in goob lagula xidho dadka waaweyn.

### Qodobka 36aad

### Danbiyada laga Galo Carruurta iyo Ciqaabaha Ka Dhalanaya

Xadgudubyada ama fal-dambiyeedka laga galo xuuquuqaha carruurta ee xeerkani ama xeerarka kale oo dhaqan-galka ahi u damaanad qaadeen carruurta waxa loo raacayaa xeerarka dhaqan-galka ah ee ciqaabta sida: Xeerka Ciqaabta Guud.

### Qodobka 37aad

### Laalis Iyo Tirtirid

1. Xeerkani waxa uu la shaqaynayaa xeerarka kale ee dhaqan-galka ah ee la'xidhiidha xuquuqaha carruurta.
2. Haddii ay iska hor yimaaddaan xeerkan iyo xeerarka kale ee sida guud uga hadla xuquuqaha carruurtu waxa mudnaanta yeelanaaya xeerkan.
3. Dhinaca kale, haddii ay iska hor yimaaddaan qodob amaba qodobbo ka mid ah xeerkan iyo xeerarka kale ee sida gaarka ah ee uga hadla xuquuqaha carruurta sida: Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Caruurta Xeer Lr. 36/2007 waxa mudnaanta yeelanaaya xeerarkaas gaarka ah, haddii aanay iyaga laftoodu ka hor imanayn shareecadda Islaamka.

### Qodobka 38aad

### Awoodda Soo Saarista Xeer-Nidaamiyeyaal

Si waafaqsan qodobbada xeerkan, wasiirku waxa uu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaal tilmaamaya hannaanka loo fulinayo Qodobada xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

## Qodobka 39aad

### Dhaqan-galka

Xeerkani waxa uu dhaqan-galayaa marka Baarlamaanku (Guurtida iyo Wakiillada) ay ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

______________________

**Md. C/risaaq Khaliif Axmed**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

______________________